



Minnesota Health Care Programs (MHCP) **Barnaamijka Adeegyada waxbarashada Keli-ahaaneed (IEP) (Individualized Education program (IEP) Services)**

Warbixinta Qoysaska

Haddii barnaamijyada ilmahaaga ee IEP, IFSP ama IIIP ay leeyihiin xaalad kasta ee la xiriira adeegyada caafimaadka, barnaamijka MHCP wuxuu kaa caawin karaa in uu kaa bixiyo barnaamijyada.

- Sharciga gobolka ayaa amraya in dugsiga uu lacagta ku dallaco caymiska Minnesota Health Care Programs (Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka ee Minnesota - MHCP) iyo kuwa shirkadaha gaarka ah arrimaha la xariira adeegyada caafimaadka.

* Barnaamijka Waxbarashada Keli-ahaaneedka (IEP), Qorshaha Adeegyada Qoyska Keli-ahaaneed (IFSP), Qorshaha Dhex-galka Hay'adaha Shakhsiga ah (IIIP)

Haddii uu cunuggaga haysto mid kamid ah adeegyada caafimaadka ee IEP, IFSP ama IIIP, MHCP ayaa kaa caawin karta in ay bixiso qarashkooda.

- | | | |
|---|--------------------------------------|-------------------------------------|
| • Daaweynta jirka | • Adeegyada Kaalmada Daryeelka Qofka | • Gaadiidka |
| • Fayow-celinta waxyeelada ka timaada shaqada | • Adeegyada caafimaadka maskaxda | • Qalabyada kaalmeynta tiknoolojiga |
| • Fayow-celinta hadalka | • Adeegyada xanaanada | • Adeegyada turjubaanka |
| • Adeegyada maqalka | | |

Lacagaha ay MHCP u bixinayso adeegyadan:

- Ha ku xisaabinin kharashyada waalidka.
- Ha xisaabin kuwa u xaddidan CAC, CADI, DD iyo TBI* ama adeegyada daryeelka guriga ama adeegyada daryeelka caafimaada ee kale.

* CAC-Daryeelka Bulshada ee badeli kara shakhsiyadka qaba xauun raagay
 CADI-Waxyaabaha Bulshada Ka Badeli kara ee shakhsiyadka naafada ah

DD- Koritaanka Leh Itaaldarrida (Developmental Disabilities)
 TBI-Dhaawaca Jaaha-Wareerka Maskaxda



Dugsiga Ilmahaaga:

- Wuxuu u baahan-yahay warbixinta caymiska caafimaadka ilmahaaga si loogu diro biilka.
- Waa in lagu ogeysiya sanad kasta haddii qorshooyinka biilka dugsiga loo qorayo MHCP.
- Wuxuu doonaya ogolaanshahaaga si u fasaxo warbixinta ilmahaaga ee la xiriira biilka. Waxa aad la noqon kartaa ogolaanshahaaga waqti kasta asaga oo qoraal ah.
- Marka hore waa in aad u dirtaa biilka caymiska caafimaadkaaga gaarka ah, hadii aad leeda-hay caymis.
- Wuxuu u baahan-yahay ogolaanshahaaga oo qoraal ah si loogu diro biilka caymiska gaarka ah ee ilmahaaga.
- Waxaa bixinaya saamiga dawladda federaalka (qiyaasti 1/2 wadarta - Fasiraaddada Waxtarrada Caafimaadka [Explanation of Medical Benefits]).
- Wuxuu siin doona adeegyada IEP ee ilmahaaga ayada oo wax qiima adiga kuu ahayn.

Adeegyada IEP ee ilmahaaga ma is-badeli doonaan ama ma la joojin doono:

- Haddii aadan siinin ogolaanshaha dugsiga si loogu diro biilka adeegyada IEP.
- Haddii aadan siinin warbixinta dugsiga ee ku saabsan caymiska caafimaadka ilmahaaga.
- Haddii MHCP ka lumo ilmahaaga asaga/ayada ama kharashka caymiska caafimaadka gaarka ah.

Haddii caymiskaaga gaarka ah uu bixinayo adeegyada IEP:

- Lacagaha joogtada ah ee caymiska kor bay u kici karaan.
- Adeega xadidan iyo heerarka ogolaanshaha ka hor way is-badeli karaan.
- Heerka ugu badan ee caymiska qofka-cimrigiisa waxaa laga yaaba in ay waxyeelayso.



Macluumaadkan waxaa loo helaya shakhsiyaadka naafada ah qaabab ka baddelan waxaana hay'adaada ka waci kartaa (651) 431-2670 ama (800) 657-3739. Dadka dhegaha ama maqalka culus qaba (TTY) ee isticmaalaan qalabka maqalka culus waxay kale ay isticmaali karaan wacitaanka Qeybta Laliinta Wararka ee Minnesota (Minnesota Relay) (800) 627-3529. Qeybta Hadal isu-Gudbinta (Speech-to-Speech), waxay wacayaan (877) 627-3848. Waxii kaalmo dheeraad ah ee la xiriira xuquuqda sharciga iyo badbaadinta si loo helo adeegyada faa'iidooyinka siman ee dadka, waxaad la xiriirtaa isuduwaha hay'adaada ee ADA.